


**Xaalladaha Caabuqa**



## **Infantile Seborrhoeic Dermatitis / Cradle Cap**

**Qodoba Muhiim ah**

- Jirada maqaarka ee afka qalaad lagu yiraahdo (Seborrhoeic dermatitis) cuncun ma leh waxna ma yeesho ilmaha yar
- Ka fogow saabuunta maadama laga yaabo in maqaar xanuunku kaga sii daro
- Isticmaal saliida aan udgin ee qubayska
- Isticmaal kareemada jirka qooya sida aqueous ama kareemka sorbolene
- Saliida saytuunka (Olive oil) ayaa laga yaabaa in madaxa lagu duugo dhowr jeer asbuucii si loo qaado tohobta
- Seborrhoeic dermatitis waxay ka baaba'da markuu gaarto ilmaha da'diisu laba bilood

**Muxuu yahay?**

Jirada maqaarka ee afka qalaad lagu yiraahdo (Seborrhoeic dermatitis) waa cudur guud oo maqaarka ku dhaca khaasatan lafta madaxa iyo meelaha laablaabma ee carruurta koran. Sida eksimada carruurta yaryar (atopic), seborrhoeic dermatitis cuncun ma leh. Carruurta dhalatay badankood wuxuu kaga baxaa da'da laba bilood waana sii socotaa. Kani waa ka duwan yahay eksimada carruurta wuxuuna ku dhacaa carruurta labada bilood jirta waana sii socdaa. Midka sahlan iyo kan badanaa ku dhaca carruurta waxaa loogu yeeraa cradle cap.

**Xaggee ku dhacaa?**

Carruurta dhalatay, barta badanaa ay jiradu asiibto waa lafta madaxa ama basada waxaana si cad uga muuqata toxob leh midab isugu jira jaallo-cadaan, taas oo adag kuna dhegan timaha ama basada. Wuxuu hoos ugu soo degi karaa wajiga bartamihiiisa, dhegaha gadaashooda iyo surka. Meelaha ilmaha naabiga looga xero iyo kilkilada ayuu iyadana ku dhacaa halkaas oo uu aad u guduudan yahay, badanaana sarcaha ayuu ku dhegaa. Cudurka maqaarka ee loo yaqaan Seborrhoeic dermatitis wuxuuna waxyeellaa laymanka sarcanyaha waxaana ku dhaca cudurka afka qalaad lagu yiraahdo (candida).

**Sidee loo daweyyaa?**

Hadduu sahlan yahay, cradle cap-ka waxaa lagu dawayn karaa kareemada jirka qooya oo loo yaqaan aqueous cream ama sorbolene cream ama saliida saytuunka (olive oil). Haddii ay aad u xoogan tahay waxaa intaan loogu sii dari karaa salicylic acid cream ama cortisone cream awoodiisu hoosayso waase in dhakhtar ama farmashiyeyaan kugula taliyaa.

## Somali - Infantile Seborrhoeic Dermatitis/Cradle Cap

Jirada maqaarka oo loo yaqaan Seborrhoeic dermatitis oo ku dhacda meelaha naabiga ilmaha looga xiro waxaa badanaa lagu daweyyaa iyadoo biyaha loogu darayo saliida qubayska iyo saabuunta oo lagu bedelo kareemka la yiraahdo aqueous cream ama boomatada gacanta ku baabaáysa. Cortisone cream sahlan ayaa laga yaabaa in dhakhtarku kugula taliyo in la isticmaalo iyadoo lagu darayo kan lagu daweyyo candida. Haddii furuuruc ku dhaco wajiga waxaa laga yaabaa in la isticmaalo cortisone cream sahlan hal ama laba maalmood dabadeedna si joogta ah loo wado sii marinta jir qooyaha.

Macluumaadka intaas ka badan weydii

Kalkaaliyahaaga caafimaadka hooyada iyo ilmaha.

Farmashiistaha.

Dhakhtarkaaga.

Maqaar yaqaanka.